



WARBIXIN KU SOCOTA DAMAANAD-BIXIYAYAASHA

Waa maxay doorka damaanad-bixiyaha?

Haddii aad tahay damaanad-bixiye, waxaad shubi doontaa iyo / ama ku ballan qaadi lacag si loo hubiyo in qofka xiran uu raaco dhammaan shuruudaha amarka sii-daynta. Wuxaan sidoo kale ka fikiri kartaa hooy gelinta qofka xiran. Xubinta dhageysaneysa kiiska ayaa noqon doonta midka go'aan ka gaari doona haddii dalabkaaga, oo ay la socdaan shuruudo kale, uu yahay doorasho ka habboon in la sii hayo. Haddii qofku u go'aansami waayo dhammaan shuruudaha sii-daynta, Hay'adda Adeegyada Xudduudaha Kanada (CBSA) waxaa laga yaabaa in ay iyagu hayaan lacagta aad shubtay iyo / ama ku ballan qaaday. Haddii aad ogtahay in qofku aanu fulin doonin amarka sii-daynta, waa in aad isla markiiba soo wargeliso CBSA si aad u gudato xilalkaagii ahaa damaanad-bixiyaha.

Maxaa ka dhiga damaanad-bixiyaha mid ku habboon?

Damaanad-bixiyayaasha waa in laga filaa in ay ka marag furan marka la sameynaayo dib u eegis ku saabsan xabsi ku haynta si xubantu u qiimeyso inaad ku haboon tahay. Waxyaabaha tixgelinada waxaa ka mid ah, laakiin aan ku koobneyn inuu:

- yahay muwaadin Kanadiyaan ah ama haysta deganaanshaha joogtada ah ee Kanada (haddii uu ballan qaadayo damaanad waxqabad)
- yahay ugu yaraan 18 sano jir
- yahay mid jooga oo hadda deggan Kanada (haddii uu ballan qaadayo damaanad waxqabad)
- yaqaanno qofka xabsiga lagu hayo
- ku yimaado ikhtiyaarkiisa oo xor ah
- diyaar u tahay ku ballan qaadka lacagtaada
- bixiyo kormeeridda qofka xabsiga lagu hayo

Lacag intee le'eg ayaa loo baahan yahay?

Ma jирто qaddar lacag go'an ah oo loo baahan yahay; lacagta aad diyaarka u tahay shubiddeeda adiga ayey kugu xiran tahay. Qaddarka ugu dambeeya waxaa lagu go'aamin doonaa xilliga xubantu ku jирто dhegeysiga. Waxaa jira laba nooc oo damanadeed: deebaajiyo iyo damaanado.

Waa maxay deebaaji?

Tan waxaa caadi ahaan loo yaqaan deebaaji lacag caddaan ah. Inta lagu jiro dhagaysiga waxaa lagu weydiin doonaa halka ay lacagtu ka timiday. Waa in aanay noqon lacag uu leeyahay qofka lagu hayo xabsiga. Qofka lagu hayo



xabsiga lagama sii daynaayo xabsiga ilaa lacagtaas lasoo shubo. Hababka dhigaallada waxaa maamula CBSA.

Waa maxay damaanad?

Tan waxaa caadi ahaan loo yaqaanaa damaanad waxqabad. Waxaa kugu waajib noqon doona inaad bixiso lacagta aad ku ballan qaaday haddii qofku uu kasoo bixi waayo shuruudaha amarka sii-daynta isaga ama iyada. CBSA ayaa qiimeyn doonta xaaladdaada awoodeed ee aad ku gudan kartid ballanqaadkaaga. Tusaale ahaan, lacagta aad u qalanto rahmaadeeda waxay ku xirnaan doontaa caddeynta dhokomantiyada aad ku caddeyneysyo kuna muujineysyo hantidaaada hadda, sida caddaynta lahaansho guri, ama dakhliga sanadlahaa ah. Haddii aadan haysan dakhli ama wax hanti ah, ma laga yaabo in aad u qalanto bixinta damaanad waxqabad ah.

Goorma ayey waajibaadkaya damaanad-bixiyaha ahi dhammaan doonaan?

Kiis kasta waa mid duwan; ma jirto muddo go'ani. Sida damaanad-bixiye, waxaad mas'uul ka tahay kormeerka qofka ilaa inta arimaha socdaalka ee isaga ama iyada lasoo gabagabeeyo. Arrimaha socdaalka qofka waxay qaadan kartaa dhowr asbuuc oo kaliya, laakiin waxay qaadan kartaa sanooyin in lagu gabagabeeyo. Marka ay dhamaato, waxaad dib u heli doontaa oo kaliya lacagtaadii haddii qofka aad kormeeraysay uu fuliyey shuruudihii sii-daynta isaga ama iyada oo dhan. Haddii qofku jebiyo shardi ka mid ah amarkii sii-daynta, waxaad halis ugu jirtaa inaad waydo lacagtii aad shubtay iyo / ama ballan qaaday.

Maxaa dhacaya haddii aan doonayo in aan bedesho shardi ama naftayda ka saaro damaanad-bixiyanimada?

Waxaa la filayaa in aad ku sii ekaan doonto damaanad-bixiyanimada ilaa arrimaha socdaalka qofka ay soo gabagaboobaan. Marka ay jiraan xaalado gaar ah, sida soo-jeedinta damaanad-bixiye cusub, waxa laga yaabaa in xubantu kaa saarto damaanad-bixiyanimada. Marka ay jiraan xaaladahaasi gaar ah, ee adigu aad dooneyso in aadan dib u sii ahaanin damaanad-bixiye, waa in aad si qoraal ah uga codsato Qaybta Diiwaanka Socdaalka iyo inaad nuqullo ka mid ah codsigaaga u dirto CBSA iyo qofka ay khuseyso. Ma jirto wax damaanad ah in codsigaaga la aqbali doono. Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa in loo baahdo dhageysi cusub, ama codsiga ayaa si fudud loo oggolaan karaa ama loo diidi karaa, iyadoo wax dhagaysi ahi aanu dhicin.

Waxyaboo dheeraad ah oo ay heli karaan damaanad-bixiyayaashu

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dib u eegisyada xabsi ku haynta, fadlan arag buugga Dib-u-eegista Dhagaysiyada Xayiraadda oo laga heli karo webseydka IRB ee <http://www.irb-cisr.gc.ca/Eng/detention/Pages/detention.aspx>.